








Codka shimbiraha subaxdii




-  LIDA Portugal
-  Vilius Aistis Vilimas
-  Mohamed Abdirashid
-  5
-  Soomaali so



Yulia, ninkeeda iyo gabadhooda yar waxay ku noolaayeen tuulo yar oo xasilloon oo ku taal Ukraine. Yulia waxay aad u jeclayd in subax walba kusoo kacdo dhawaaqa shimbiraha. Marna uma malaynayn inay guri ka fog degi doonto, ama aanay ku toosi doonin dhawaaqa shimbiraha subaxdii.



Ninkeeda ayaa had iyo jeer ka caban jiray in aanu lacag ku filan haysanin, wuxuuna bilaabay inuu si aad ah u cabbo khamriga. Waxay go'aansadeen inay nasiibkooda ku tijaabiyaan Portugal. Waxaa laga yaabaa in ay halkaas ka heli karaan lacag badan si ay guri u dhistaan oo ay mustaqbal wanaagsan ugu sameeyaan qoyskooda.



Yulia waxay si fiican ula qabsatay gurigeeda cusub, waxayna bilowday inay ka shaqeyso sidii nadiifiye. Macaamiisheeda ayaa runtii aad uga mahadceliyey dadaalkeeda iyo hab-dhaqankeeda wanaagsan. Dhanka kale ninkeeda waxa uu dareemay in laga tagayo. Dhibaataada khamriga awgeed, loo-shaqeeyayaashu ma aaminaan isaga mana siin doonaan shaqo.



Maalin maalmaha ka mid ah ayuu bilaabay inuu ku qayliyo Yulia. Dabadeed, wuxuu bilaabay inuu riixo. Qayladii iyo garaacii baa ka sii daray, siiba markuu sakhraansanaa. Yulia waxay u baqday nafteeda iyo gabadheeda, laakiin ma aysan garanayn waxay samayn karto.



Markii Yulia ugu dambeyntii ay tagtay qolka gargaarka degdegga ah ee cusbitaalka iyada oo gacan ka jaban, waxay u sheegeen in rabshadaha qoysku ay dhibaato weyn ku tahay Portugal. Waxa kale oo ay sheegeen in arrintaasi ay tahay dambi, isla markaana ay tahay inay Booliska wargeliso.



Yulia waa ay ku daashay oo ma aysan dooneyn in gabadheeda yar ay ku korto guri ay maalin kasta goobjoog u ahayd rabshad. Yulia waxay ogaatay in calaamadaha xadgudubka ay horay u jireen, xitaa haddii ay qaadatay qaabab badan oo kala duwan.





Yulia waxay tagtay hoyga haweenka, halkaas oo ay dareentay in ay ka heshay ammaan ka badan intii ay haysatay muddo dheer. Taasi may dareemin tan iyo markii ay subaxdii ku toosi jirtay codka shimbiraha.



LIDA Stories

lidastories.net

Codka shimbiraha subaxdii

-  LIDA Portugal
-  Vilius Aistis Vilimas
-  Mohamed Abdirashid

